Xafiiska Eega Waajibaadka Saaran Qareennada

Ashtakoyinka iyo Baarisyada

Office of Lawyers Professional Responsibility(Xafiiska Eega Waajibaadka Saaran Qareennada)
1500 Landmark Towers
345 St. Peter Street
St. Paul, MN 55102-1218
(651) 296-3952 (Gobol Kale) 1-800-657-3601

TTY kuwa isticmaala Adeegyada Laliska MN Telefoonka Bilaashka waa 1-800-627-3529

Maxaan sameeya haddaan rumaysanahay inuu qareenku si aan toosnayn uu hawshisa u gudanayo. Qoraalka ku yaalla waraaqahaan ayaa kuu sharraxaya sidii looga jaawaabi lahaa su'aalaha sida:

- Sideebaan muranka ujrada (fee) wax uga qabtaa?
- Sideebaa loo baajiya qilaaf soo socda?
- Waa maxay qaabka waajibaadka hufnnaanta xirfadeed ee qaareenka?
- Sidebaan u soo diyaariya ashtako lid ku ah hufnaanta xirfadeed ee qarennka?

- Maxaa dhici doona haddan ashtako soo gudbiyo?
- Maxay yihiin siyaabaha kale ee lagu xalliyo shidada ka timaada qareennada?

KAHORTAGIDDA QILAAF DHEXMARA ADIGA IYO QAREENKAGA

Qilaaf yada badandkoodu waa laga hortagi karaa mar haddaad ogtahay waxa aad ka filaysid qarennada iyo sida loola dhaqmo. Talooyinka looga hortagayo qilaafaadka waxaa kamid ah:

- **Inaad Waxaad Filaneysid Ahaadan Kuwo Caqli gal ah**

Dadka qarkood way ka xumaadaan qareennada sababto ah waxey madaxooda geliyeen waxaan caqli gal ahayn. Qareenkaaga weydii waxa meesha ka soo baxaya: Dhererka muddada ay qaadaneyso? Qiimaha ku bixi doona? Iyo waxyaabaha si lama filaan ah u saameyn kara?

- **Heshiisyada Ujrada**

Dhibaatoyin badan ee qareennada iyo macaamiishooda waxey ka dhalataa markii si kala duwan loo xisaabyo ujrada. Heshiis qoraal ah kala saxiixda isla markaana si deg deg ah laguugu soo diro biilka.

- **Iskaashiga**

Sida ugu dhaqsiya badan qareenkaaga waraaqaha dukumiintiga soo ugu soo gudbi. Sidaad aweeged adna filo inuu qareenkaaga uu wax kuula socodsiiyo uuna kuu soo diro nuqullada dukumiintiga muhiimka ah.

- **Xogogaal Ahaw**

Haddaad beddeshay cinwaankaaga ama telefoon nambarkaaga, qareenkaaga u sheeg. Haddey arrimaha sharciga wax iska beddelaan, qareenkaaga la socodsii.

- **Isxiriirinta**

Filo inuu qareenkaaga kula socodsiiyo dhammaan arrimaha muhiimka ah ee meesha ka jira. Haddaadan raali ka ahayn sida wax loo wado, qareenkaaga la socodsii. Waraaqo u qor si aad u wada fahamtaan dokumiintiga ugu muhiimsan. Waxaad diwaangelisa dhammaan telefoonnada aad qareenkaaga aad u dirtid.

DHBAATOYINKA MASUULIYADA SHAQADA

Qarennada waxaa laga rabaa iany muujiyaan hawlgalid heer sare ah. Heerka shaqada ee laga rabo qareennada ee masuuliyada hawlgelintooda

waxaa soo diyarisay Maxkamadda Sare, oo ku yaalla Qawaaniinta ah in loo Hoggaansanaado Sharciyadaan. Qawaaniintaan waxaa badanaabaa laga heli karaa maktabyada caddadka Qawaaniinta Maxkamadda ee Dastuurtka Minnesota. Haddey dhacdo inuu qareen uu ku xadgudbo qawaaniintaan, qareenka waxaa dhici karta in la ganaaxo.

Dhibaatoyinka qareennada ka yimaada qaarkood waxaa wax ka qabta Xafiifska Eega Wajiibada Qaareennada. Kuwa kale shaqa kuma laha. Halkaan waxaa ku yaalla dhowr tusaale ee la xiriira habka uu Xafiiska wax uga qabto astakooyinka:

- **Dayaca iyo Dibudhaca**

Qareennada waxaa laga rabaa inay si macquulsan wax u dedejiyaan ayna si macquulsan macaamilka wax ula socodsiiyaan. Miyey kula tahay inuu qareenka waqtii ay ku qaadato si uu u eego arrimahaaga la xiriira sharciga? Waraaq u dir qareenka oo ku weydiiso si qoraal ah inuu wax kuuga sheego sida ay wax u jiraan. Haddii aadan kahelin jawaab ku qancisa, ashtako ka soo qor.

- **Soo Celista Waraaqaha Kiiskaaga**

Macaamilka wuxuu beddelan kara qareenka wuxuu doonana sabab ka dhigta. Beddelidda qareenka waxey qaadaneysaa waqti ama dibudhacna abuurta, laakiin taasi u mid macaamilka meel u taala. Xaddaada rabtid inaad waraaqaha kiiskaaga aad qareenkaaga ka so ceshatid, wac oo sidaa ku codso. Haddaadan waraaqaha aad dalbatay aadan ka helin, markale dalbo adiga oo kug codsanaya warqada caddeyn ah boostada. Haddey dhacdo inaadan weli helin waraaqahaaga, ama uu qareenka ku yiraahdo waa inaad bixisid qarashka nuqulka, soo ashtakee.

- **Lacagta iyo Xisaabinta**

Mararka qaarkood qareennada ayaa maamula lacagta macaamilka. Waxaa mararka qaakood dhacda iney qareennada hayaan lacag kaaga soo noqotay lacag eedbax ah oo uu macaamilku leeyahay. Mar haddii uu qareenka maamulayo lacagta macaamilka, qaareenku waa inuu xisaab ku sheega meesha ay lacagtu ku baxday sida ugu dhaqsiya badan. Haddey ay dhacdo iney waqti badan lacagta uu qareenka kaala soo daaho ama xisaab buuxda aan laguu soo dirin, soo ashtakee.

- **Qilaafk ka yimaada Danaha**

Mararka qaarkood waxaa dhacda inuu qareenka uu waakiil u yahay dhowr qof oo ay amuuri ka dhaxeyso. Xalaado kale ayaa jira ee qareenka ii kiis uu qof u macaamil u aha uu macaalkaasi noqdo mid hadda dhinaca

kale ka ah dacwadda. Mararka qaarkood waxaa dhacda inuu macaamilku usan waxba ka qabin hawsha uu qareenka wado xitaa iyada oo ay dhici karto inuu qilaaf ka yimaado. Haddey kuula muuqato inuu qareenkaaga uu kula jiro dana kala duwan oo is qilaafaya si qaldanna uu hawsha uu u wado, soo ashtakee.

- **Daacadxumada**

Qarennada aslamba looma oggola inay si bareera ay been u sheegaan, qarennada waa iney dadaal xooggan ku muujiyaan difaaca danaha macaamilkooda. Tani macneheedu waxey tahay iney macaamilkoodu uu yahay midka runta arrimaha ka sheegaya. Marka dacwaddu jirto, xaqiiqada dacwadaha badankooda waxaa lagu dhammeeyaa maxkamadda.

DHIBAATOYIN KALE

- **Ujrada**

Badanaaba arrimaha ku taxluuqa waxaa lagu dhammeeya inta la soo gaarin Xafiiska Qareenada. Qareeenka iyo macaamilkiisu waxaa u badantahay iney heshiis wada gaaraan. Dhexdhexaadinta waa sid ugu sahlan ee lagu dhammeeyo qilaafaadka la xiriira ujrada. Waxaad wici kartaa The Minnesota State Bar Association (612) 333-1183, cinwaankda iyo telefoon nambarka ee xafiiska dhexdhexaainta ee kuugu dhow. Mararka qarkood, haddi ay dhacdo inuu qareenka si sharci darra uu was ujra kugu soo dallacay, waxaa laga qaadaya tillabo sharci ah.

- **Kartixumada**

Qareennada, sida xirfadlayaasha kale, mararka qaarkood waxey sameyaan qaladaad. Qareenku waxaa dhici karta inuu hawsha u fuliyo si kale, oo aan boqolkiiba boqol ahayn lakiinse uusanula jeedin inuu sharcia ku jebiyo. Haddey dhacdo inuu macaamilku dhib kaga soo gaaray arrintaa, ahstakeyn karti xumo ah ayad u raacan kartaa. Arrimaha lala xariira kartixumida badankooda **ma'aha** kuwo uu xalliyo Xafiiska Eega Waajibaadka Saaran Qareennada.

- **Adaabta Shaqsiyeed**

Ashtakoyinka ay badankoodu ku lug leeyihiin adaabta la xiriirta qareenka oo ka baxsan midda shaqada, sida isticmaalka aflagaadada, qilaafaadka u dhaxeya milkiilaha iyo ijaartaha ama qof waxay deymiyeye iyo kan deynta lagu leeyahay, kuwaashi oo dhan **ma'aha** kuwo uu xalliyo Xafiiska Eega

Waajibaadka Saaran Qareennada. Arrimaha culus, sida qiyaamada iyo falal dembi, tillabo ayaa laga qaadayaa.

- **Qareenka Qofka Kale**

Ma ashtakeyn kartaa qareenka u doodaya qofka dacwaddu idinka dhaxeyso? Haa, laakiin taasi waxey midaan wax u dhigan aan laga qan rakin sababo xiriira qaabka sharciga ku dhisan qaybo iska soo horjeeda. Qarennada waa iney dadaal xooggan ku muujiyaan difaaca danaha macaamilkooda. Qaabkaan waxaa badanaaba ka soo baxa in lagu kala duwanaado sida ay wax u dhaceen uurkuqaadna uu meesha ka dhaco. Waxaa keliya oo ciqaab ka imaaneysa waa marka u dhaco xadgudub aan loo dulqaadan karin, iyo marka ay maxkamaddu ay arrinta tillaab ka qaadaday kiiska.

- **Ashatkoyinka Kuwa Wax Amaahiya**

Xafiiska Eega Waajibaadka Saaran Qareennada ma'aha shirkad lacagta aruurisa. Ashtakooyinka badankooda ee ku jeeda qareennada oo aan lacagta bixinin waxaa ku habboon in lala aado maxkamadaha madaniga. Xaalado aad u adag markay dhacaan ayaa ciqaab ka imaaneysa waana marka s tusaala ahaan ay jiraan xaalado joogta ah oo u si ulakac xukun uu u dhacay, iyo jeegaag lago soo diray koonto xiran, qiyaamo, iwm.

- **Ashtakoyinka Eedesanyaal Dembi Galay**

Maxkamadda Sare ee Minnesota ayaa amar ku bixisay in ashtakoyinka ka yimaada dembiilyaal dacwo loo haysto ama kuwo la xukumay oo ku andacoonaya inuusan qareenkoodu si fiican u difaacin, iney arrimahaas lagu dhammeyo lagu xalliyo qaabka sharciyada dembiyada. Haddey maxkamaddu ku caddeysho inuu qareenka uu sharciga ka xadgudbay waxaa xigta in tillabo laga qoodo.

- **Ashtakoyinka Dhan ka ah Garsoorayaasha**

Asthakoyinka dhan ka han garsoorayaahsa waxaa qaabisha hay'ad kale, Guddiga Baara Garsoorka (651) 296-3999.

SIDEEBAA ASHTAKOYINKA LOO XAALEEYA

- **Soo Dirista Ashtakada**

Ashtakoyinka waa in loo diraa Office of Lawyers Professional Responsibility, 1500 Landmark Towers, 345 St. Peter Street, St. Paul, MN 55102-1218 (651) 296-3952.

Waraaqda ahstakada waa inay kamid noqdaan magaca ashtakoodaha iyo magaca qareenka iyo cinwaannada, iyo qoraal wax ka

sheegaya anshax xumada loo maleeyo inay dhacday. Nuqullada dokumiintiyada muhiimka ahna waa in la soo daraa.

- Xafiiska Eega

Waajibaadka Saaran Qareennada **(Office of Lawyers Professional Responsibility)**

Xafiiska waxaa aasaastay Maxkamadda Sare ee Minnesota si loo baaro ashtakoyinka anshaxa ku lug ee qareennada ka dhan ah. Xafiiska waxaa hawshiisa kormeera Guddiga U Qaabilsan Xilka Qareennada, oo ka kooban sagaal xubnood oo qareenno ahayn iyo toban iyo afar xubnood oo qareenna ah. Hay'ado samafal ee guddiyaasha degmooyinka ee gobolka oo dhan ku fidsan ayaa ka caawiya baarista ashtakoyinka. .

- **Dib U Eegista Ashtakoyinka**

Laba usbuuc kaddib marka ay soo gaarto ashtagaka, jawaab qoral ayuu Xafiiska soo diraya. Jawaabta waxay si rasmi u sheegeysaa in ay ashtakadu mudatanhay baaris amaba ay tahay mid aan sal iyo baar lahayn. Kiisaaska tusaalo ahaan u baahan inay yihiin kuwaa aan baaraynin waxaa kamid ah: muranka joogtada ee la' xariira ujrada; ashtkoyinka la xiriira dhqan xumo lagu arkay qareenka oo ka baxsan hawlaha sharciga; arrimaaha badaankooda oo ay weli dacwadoodu hortaallo maxkamadda, waahaddeysan arrintu mid noqon si cad xadgudub ah; dacwoyinka badanaa la xiriira qareennada ay maxkamddu magacawday; iyo kuwo kale oo aysan ahayn kuwo ay si fiican wax looga qabto anshaxa ama xaaladaha aqlaaqda.

- **Baarista**

Ashtakoyinka badankoodu waxa baara guddiyada anshaxa ee deegaanka. Guddiyadaan waxey badanaaba la xiriiraan ashtakeyaha iyo qareenka waxey eegaan dukumiintiga muhiimka ah. Guddiga ayaa marka fikradooda u gudbinaya Xafiiska Eega Waajibaadka Saaran Qareennada haddii wax tillaaba ah laga qaadayo ama haddi kale.

- **Go'aanka**

Xafiiska Eega Waajibaadka Saaran Qareennada ayaa go'aanka ka gaaraya haddu qareenka uu jebiyey qawaaniinta la xiriira. Haddey taasi jirto, waxay ku talinyaan tillabo ka qaadis. Tillabo ka qaadisyada wa a badanyihin. Midda ugu badan waa "digniin". Digniinta u hoggaansamida waxaa qareenka loo gudbiya marka ay anshax xumada qareenka ay ahayd mid kooban, ahayna mid sidaa u sii weyn – tusale waxaa ah dayaca hal gal. Wixii digniin qaas waxaa rafcaan ka dalban kara ashtakeeyaha oo u

dira xubin kamid an Guddiga Qareennada. Qiyaastii 125-150 qareen digniin u hoggaansamid gaar ah la saara sanad waliba.

- **Digniinta U Hoggaamsamida ee Maxkamadda Sare**

Sharci jebinta culus ee qawaaniinta waxa digniinta u hoggaansanaanteeda bixisa Maxkamdda Sare ee Minnesota. Qaaladaadka s sida lacag qaadashada, dembiyada, si ulkac ah maxkamdda been loo sheego iyo ka danaysiga dhowr macaamiil, waxey keeni kartaa in lagu waayo shatiga lagu hawlgalka qarennimada. Dhammaan dacwadaha u hoggaansaan la'aanta waxey ka dhacaan Maxkamdda Sare ee Minnesota ay u furtantahay dawweynaha. Maxakmaddu waxey hoggasaanaan la'aan ugu ciqaabta qiyaasti ila 40 qareen sannadkiiba.

- **Aqbaarta**

Haddad ahstako soo dirtid, Xafiiska Eega Waajibaadka Saaran Qareennada wuxuu kula socodsiinaya meesha ay baaritsu iyo qaabka ay marayaan. Hadaad ashtakeysid qareenkaaga, waxaa laguu soo diraya nuqulka jawaabta qareenkaaga. Go'aanka kama dambeysta ah waxa markastaba laguugu soo dirayaa si qooraal ayna fasiraad la socoto.

- **Waxa Uusan Kuu Qaban Karin Xafiiska Eega Waajibaadka Saaran Qareennada**

Xafiiska Eega Waajibaadka Saaran Qareennada **kuuma qaban karo in:**

-- uu dad uu u dodo arrimo sharciga ah ama talobixin.

-- lacaga ama hati laga qaado qareenka oo la loo celilyo maacaamilka ama kuwa wax ku leh.

-- la dacwiyo qareenka sababo la xariira xilqaad xumo, ama laguu qabto hawl qareenka laga rabay inuu qabto.

-- la baddalo ujra uu qareenka sheegtay ee u la rabo in laguu soo celiyo xitaa haddey ujradu tahay in foqal caqli ah.

Hawsha uu qabto Xafiiska Eega Waajibaadka Saaran Qareennada wuxuu ku kobanyahay oo keliya ashtakoyin anshax xuma iyo in la qaado tillabo u hoggaansaan qarrennada marki ay sidaa ku haaboontahay.

- **Kaydka Amniga ee Macaamilka**

Maxkammada Srae ee Minnesota waxey aasastay Kaydka Amniga ee Macaamilka si loo bixiyo dacwado ka dhan qarennada oo **si bareer ah iyo qa'innima ah uu macaalku lacag ay ku waayeen.** Aqbaar dheeraad ah waxaa laga heli karaa Xafiiska EegaWaajibaadka Saaran Qareennada

- **Jawaabaha ku Jeeda Su'aalaha Badanaaba La Isweydiiyo**

Su'aal. Ma jirtaa wax lacag ee layska rabo baarista ashtakada?

Jawab. Marna ma jirto lacag ee layska rabo baarista ashtakada.

Xafiiska Eega Waajibaadka Saaran Qareennada waxaa lagu maalgeliya ujro laga qaado qareennada.

S. Wax dhibaato ma iga soo raaci kartaa haddaan qareen ashtakeyo?

J. Qaanuunka 21 wuxuu leeyahay hadal ama ashako ka dhan ah qareen ee Xafiiskaan ama kuwa wax u baara, "waa mid si wayn u asturan mana noqon karto mid berri kamaalin ay sal u noqoto dacwad madani ah ee lacag lagaga raadinayo qofka wax ashtakeyey, dacwad ama hadalba. is absolutely privileged and may not serve as a basis for liability in any civil lawsuit brought against the person who made the complaint, charge or statement."

Q. Ashtakoyinka ka dhan ah qareeennada shacaa miyaa laga qaada?

A. Qaanuunka guud wuxu yahay ashtakoyinka ka dhan qareennada inaanan shaaca laga qaadin. Galalka baarista cid aan qareenka ahayn lama siinayo. Qaybo kamid ay galka shaaca ayaa la qaadi karaa haddii arrimo baaris ay la xiriirto. Halka mid ah ee ka duwan qanuunkaan waa kiisaska la Maxkamada Sare, dacwadaha iyo dhegeysiyada, oo la xiriira arrimo culus, oo u fucan dadweynaha.

- **Dhammadka**

Xafiiska Eega Waajibaadka Saaran Qareennada wuxuu dadwenaha iyo xirfalayaasha uu u fidiya adeegyo, dib-u-eegid ashtakoyinka ah iney anshax ka dhan ah qarennada Nidaamka waxaa loogu talagalay inuu ahaado mid cadaalad u ah ashtakeyaha iyo qareennada si markaasi ashtakooyinka loo sida ugu macqullsan iyo dhaqsiya badan.

Isweydiinta su'aalo dheeraad ee ku saabsan soodirista ashtako ama sida waaraaqaahaan loog warbaahiyo qaab kale wac (651) 296-3952 (Gobol kale: 1-800-657-3601). TTY ee isticmaal Adeegyada Laliska ee MN telefoonka bilaasha 1-800-627-3529.

Shabakada Internetka

http://lprb.mncourts.gov